Waxaad heshay sharciga degganaanshaha ee Finland

Waaxda socdaalku waxaa ay ku siisay go'aan oggolaansho ah oo ku saabsan codsigaagii magangalyoddoonista. Waxaa arrinkaa loola jeedaa in aad heshay sharciga degganaanshaha kummeelgaarka ah ee Finland.

Wakiilka

Wakiilkaaga shaqadiisii ayuu sii wadanayaa. Isaga ayaa kaa caawin doona arrimaha iyo halwha aad ka dhammaysanayso xafiisyada dawladda, illaa iyo inta aad ka gaarayso18-ka sano.

Go'aanka waxaa la socda oo aad heleysaa kaarka sharciga degganaanshaha dalka

Kaarka degganaanshaha dalka waxaa uu caddaynayaa in aad xaq u leedahay in aad joogto Finland. Kaarka waxaa lagu asteeyay ama lagu qoray, illaa iyo mudada uu sharciga degganaanshaahaagu shaqaynaayo.

Kaarka ha iska luminin. Haddii uu kaarkaagu kaa lumo, waa in aad barta adeegga ee Waaxda socdaalka ballan ka qabsato, si laguugu dalbo kaar cusub. Kaarka cusub waa lacag.

Marka aad buuxiso 18 ka sano, mardambe ma yeelanaysid wakiil, waana in aad adigu iskaa u raadsato kaar cusub oo codsigiiisu lacag yahay, Haddii uu kaarkaagu kaa lumo, waa in aad barta adeegga ee Waaxda socdaalka ballan ka qabsato, si laguugu dalbo kaar cusub.

Mrka aad ku nooshahay dalka Finland gudihiisa, waa in aad leedahay baasaboor waqtigiisu shaqaynaayo oo aan dhacsanayn

Sida sharciga Finland uu dhigaayo, waa in aad leedahay baasaboor waqtigiisu shaqaynaayo. Marka aad leedahay baasaboor, Finland waad ka dhoofi kartaa, waadna ku soo laaban kartaa.

- **Haddii aad Finland ka heshay sharciga heerka qaxootinnimo ama kan heerka labaad ee badbaadada**

  Haddii lagu siiyay sharciga qaxootinnimada ama kan heerka labaad ee badbaadada ee dalkaan Finland, waad heysan kartaa baasaboorka dalkaaga hooyo, ama haddii aad doonayso waxaad heli kartaa baasaboorka qaxootinnimada ama kan loogu talaggalay dadka aan

waddanka u dhalan ee ajnabiga ah. Adigu xaq uma lihid in aad isla haysato baasaboorka dalkaaga iyo baasaboorka laga bixiyo dalkan Finland. Haddii aad wali haysato baasaboorkii dalkaaga, waa in aad ku wareejisaa Waaxda socdaalka, marka aad hesho baasaboorka qaxootinnimada ama kan dadka ajnabiga loogu talaggalay

Haddii aadan haysan baasaboorka dalkaaga hooyo, waa in aad codsataa baasaboorka qaxootinnimada ama kan dadka ajnabiga ah:

- Haddii lagu siiyay magangalyo qaxootinnimo, waxaad heleysaa baasaboorka qaxootinnimada,
- Haddiise lagu siiyay sharciga heerka labaad ee badbaadada, waxaad heli kartaa baasaboorka ajaanibta. Codsiyadu waa lacag.

Fiito gaar ah u yeelo, haddii marka aad heshay sharciga qaxootinnimada ama kan heerka labaad ee badbaadada, oo aad raadsado baasaboorka dalkaagii, waxaa arrinkaas uu horseedi karaa in lagaala noqodo ama la baabi'iiyo sharcigaagii qaxootinnimada ama kan heerka labaad ee badbaadada.

- **Haddii aad sharciga degganaanshaha ku heshay sababo kale**

Haddii aad sharciga degganaanshaha ku heshay sababo kale oo aan ahayn kan qaxootinnimada iyo midka heerka labaad ee badbaadada toonna, Waa in aad leedahay baasaboor aan dhicin oo waqtigiisu shaqaynaao oo dalkaaga hooyo ah, ama waa ina aad codasto baasabaroor cusub oo dalkaaga ah.

Waxaad heli kartaa baasaboorka ajnabiga, haddii hawlawadeennada dalkaaga aadan ka heli karin baasaboor, ama aad tahay qof jinsiyad la'aan ah, ama ay jirto sabab gaar ah oo kale oo aad ku heli karto baasaboorka ajnabiga. Xaaladdaan tan oo kale, Waaxda socdaalka ayaa ka fiirsanaysa, in adiga lagu siin karo baasaboorka ajnabiga iyo inkale. Codsigu waa lacag.

Waxaad noqonaysaa xubin magaalo

Sooshaladda xerada qaxootiga iyo wakiilkaaga ayaa kula dhammaynaaya hawlaha la xiriira u guurista magaalada. Guuritaankaaga kaddib, mar dambe xubin kama tihid xerada qaxootiga, waxaad noqonaysaa xubin magaalada ka tirsan.

Waxaad wax baran kartaa adigoo aan u baahan wax oggolaansho gaar ah

Sida uu dhigaayo sharciga dalkaan Finland. Carruurta waxaa saaran waajibka ah waxbarashada. Waxaa arrinkaa loola jeedaa,waxaa ilmo walbaa ku waajib ah in uu dhammeeyo dugsiga hoose dhexe. Kahor inta aan dugsiga hoose la bilaabin, waa in ilmuhu uu ka qaybqaato waxbarashada hore.

Haddii aad dalkaan Finland gudihiisa hore ugu soo dhigatay dugsiga hoose dhexe ama aad ka baxday da'dii waxbarashadaas ,waajibka waxbarashaduna uu adiga ku khuseeyo, waxaad raadsan kartaa goob waxbarasho, waana in aad oggolaato waxbarashadaas. Uma baahnid in aad wax oggolaansho gaar ah u heshid waxbarashadaas.

Xuquuqdaada shaqo qabasho waxaa laguugu sheegay go'aankaaga

Dalkaan Finland carruurtu ma shaqeeyaan, waxaa ay tagaan oo kaliya iskuulka. Haddii aad doonayso in aad shaqeyso, waa in da'daadu ay weyn tahay 15 sano.

Go'aankaaga ayaa lguugu sheegay in aad Finland gudaheeda ku ledahay xuquuqda shaqo qabasho iyo inkale. Xuquuqda shaqo qabshadaada waxaa sidoo kale laguugu qoray kaarkaaga sharciga degganaanshaha .

Waxaa intaas dheer oo aad booliska ka dalban kartaa kaara aqoonsiga shakhsiyadeed

Booliska waxaad ka dalban kartaa kaarka aqoonsiga shakhsiyadeed, waana kaarka rasmiga ah ee aqoonsiga shakhsiyadeed. Waxaa uu kuu fududaynayaa sidii aad hawlahaaga uga dhammaysan lahayd Finland gudaheeda. Codsiga kaarka aqoonsiga shakhsiyadeed waa lacag.

Waxaad fiiro gaar ah u yeelataa arrinka ah, in baasaboorka qaxootiga ama baasaboorka ajnabiga, midkoodna uusan ahayn dukumintiga rasmiga ah ee aqoonsiga shakhsiyadeed, haddii aanay ku qornayn calaamadaha sugaaya aqoonsiga shakhsiyadeed. Waxrbixinta dheeraadka ah ee hubinta aqoonsiga shakhsiyadeed waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Waaxda socdaalka:: migri.fi/henkilollisyys-varmistamatta.

Hadda waxaa xubinta qoyskaagu uu codsan karaa sharciga degganaanshaha Finland

Sharciga dalka Finland ayaa lagu qeexay, dadka ah xubnaha qoyskaaga ee soo codsan kara sharciga degganaanshaha dalkan Finland. In xubinta qoyskaagu uu helo sharciga degganaanshaha ee dalkaan Finland, waxaa ay ku xirantahay hadba nooca sharciga degganaanshaha ee adiga lagu siiyay. Codsigu waa lacag. Arrinkaan waxaad kala sheekeysataa wakiilkaaga.

Haddii aad heshay aqoonsiga heerka qaxootinnimo, waa in aad fiiro gaar ah u yeelataa, in xubnaha qoyskaaga aan loo shardiyayn in la sugo dhaqaalaha nolosha, haddii ay sharciga degganaanshaha ku codsadeen xiriirka qoysnimo awgeed muddo saddex bilood gudahood ah, laga soo bilaabo, markii aad heshay wargelinta go'aanka.

Haddii aad heshay aqoonsiga heerka qaxootinimo ama tan heerka labaad ee badbaadinta, waxaa go'aanka laguu soo raacinayaa tilmaanbixin, taasoo laguugu sheegi doono, qaabka ay xubnaha qoyskaagu sharciga degganaashaha dalka uga dalban karaan Finland.

Warbixinta dheeraadka ah ee ku saabsan codsiga xubinta qoyskaaga ah ee sharciga degganaanshaha Finland, waxaad ka heleysaa boggayaga internetka: migri.fi/perheenjasenen-luokse-suomeen.

Xusuusnoow inaad cusboonaysiiso sharcigaaga degganaanshaha

Haddii aad doonayso in aad sii joogto Finland, kaddib marka uu sharcigaaga degganaanshaha ee aad haatan haysato kaa dhaco, waa in aad codsataa cusboonaysiinta sharciga degganaanshaha sii soconaya, kahor inta aanu kaa dhicin kan aad hadda haysato. Codsiga sharciga degganaanshaha sii soconaya waxaa laga codsadaa Waaxda socdaalka.

Codsiga sii soconaaya waxaa laga codsadaa ineternetka markasta ao arrinkaas uu suurtaggal kuu yahay. Tilmaanbixinta arrinkaas ku saabsan waxaad ka eegi kartaa boggayaga internetka: migri.fi/jatkolupa

- **Haddii aad heshay sharciga qaxootinimada ama kan heerka labaad ee badbaadinta**

Haddii aad heshay sharciga qaxootinimada ama kan heerka labaad ee badbaadinta, Waxaa suurtaggal ah in sharcigaaga degganaanshaha koowaad kaddib aad si toos ah u qaadato sharciga degganaanshaha ee joogtada ah. Waxaa kugu waajib ah in aad Finland ku noolayd afar sano.

Faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan sharciga degganaanshaha ee joogtada ah, waxaad ka heleysaa boggayaga internetka: migri.fi/pysyva-oleskelulupa.

Haddii aad codsanayso sharciga degganaanshaha sii soconaya ama baasaboorka, oo cinwaankii lagaala soo xiriiraayay uu isbeddelo, waana sida ugu dhakhsaha badan aad isbddelkaas ula soo socodsiisaa Waaxda socdaalka

Waxaa kugu waajib ah in aad Waaxda socdaalka u soo sheegtaa haddii uu isbeddel ku yimaado cinwaanka iyo telefoonka lagaala soo xiriir karo, markii ay Waaxda socdaalku falanqaynayso codsigaaga. Inta la falanqaynaayo codsigaaga, Waaxda socdaalku gurigaaga ayay kuugu soo diri kartaa waraaqaha sida caadiga ah boosta loogu soo diro, ama waxaa ay kuu soo diri kartaa waraaq ogeysiin ah oo laguugu sheegaayo in warbixin laguu soo diray, taasoo aad ka soo qaadan karto goobta boostada ee laguugu soo sheegay waraaqdaas ogeysiinta ah.

Haddii aad codsigaaga u samaysay qaab elegtoroonig ah, waxaad isbeddelka cinwaankaaga ku soo sheegtaa nidaamka adeegsiga dano dhamaysiga internetka ee la yiraahdo Enter Finland: enterfinland.fi

Haddii aad codsigaaga u samaysay qaab qoraal waraaq ahaan ah, Waxaad cinwaankaaga isbeddelay noogu soo sheegtaa foomka la buuxinaayo ee ku jira boggayaga internetka: migri.fi/muutoksista-ilmoittaminen. Foomka waxaad ku soo dirtaa cinwaanka boostada ee waaxda socdaalka, ama waxaad si toos ah u keenta barta adeegga ee Waaxda socdaalka xilliyada ay furan tahay. Foomka waxaad soo gelisaa baqshad, kadibna ku rid sanduuqa boostada ee barta adeegga.

Aqoonsigaaga qaxootinimo ama sharcigaaga heerka labaad ee badbaadada, mararka qaarkood waa la joojin karaa ama waa la kansali karaa

Sharcigaaga aqoonsiga qaxootinnimo ama kan heerka labaad ee badbaadinta waa la joojin karaa ama waa la kansali karaa, haddii aad tusaale ahaan u safartay dalkaagii ama aad raadsatay baasaboor..

Aqoonsigaaga qaxootinnimo ama kan heerka labaad ee badbaadinta waa la joojin karaa ama waa la kansali karaa, haddii aad hawlwadeennada siisay macluumaad khalad ah, ama kuwo marinhabaabin ah, kuwaasoo saamayn ku lahaa go'aankii lagu siiyay.

Joojintaas ama kansalistaas kaddibna waxaa waaxda socdaalku ay cadayn ku samaynaysaa, in sharcigaaga degganaanshuhu uu yahay mid sabab leh iyo inkale. Waxaa sidoo kale ay Waaxda socdaalku ka fiirsanaysaa, in dalka lagaa saaro oo la amro in aadan dalkaan soo geli karin.

Dambi ku soo oogista ayaa noqon karta sabab keeni karta, in sharcigaagii axootinimada am akan heerka labaad ee badbaadada ee lagu siiyay mar labaad dib looga fiirsado. Waxaana ka fiirsashadaas ay keeni kartaa in sharcigaagii qaxootininmada ama kii heerka labaad ee badbaadada lagaa joojiyo ama lagaa kansalo, waddankana lagaa saaro.

Dhalashada dalkan Finland gadaal ayaad ka codsan kartaa

Dhalashada Finland waxaad codsan kartaa, marka aad ku nooleyd Finland afar ama shan sano oo xiriir ah. Xilliga ku noolaanshaha e la iska dalbayaa, waxaa ay ku xiran tahay sababta lagugu siiyay sharciga degganaanshaha iyo in aad u taqaanno luqadaha finishka ama iswidhishka si aad u fiican ah oo ah heerka la iska dalbaayo. Helitaanka dhalshada waxaa shardi u ah, in aqoonsigaaga shakhsiyadeed loo caddeeyo si aaminaad leh. Waana in aad tahay qof dhaqaale ahaan wax ka qabsada dalkan Finland gudihiisa. Dambiyadu waxaa ay kaa hor istaagi karaan helitaanka dhalashada.

Waxaad warbixin dheraad ah ka heleysaa

- Bogagga internetka ee Waaxda socdaalka: migri.fi/turvapaikka-suomesta
- Fiidiyoowyada Waaxda socdaalka "Go'aanka oggolaanshaha ah": migri.fi/videot-turvapaikanhakijoille